Joogistaada isbitaalka

Macluumaadka bukaanada qaliinka lagu samaynayo

Maxaa isbitaalka lala imanayaa

- Dharka hurdada, waxaa la doorbidayaa dharka lagu seexdo habeenkii
- Goono
- Dacas
- Qalabka loo adeegsado musqusha sida buraashka, daawada ilkaha, shaambo, saabuun, buraashka timaha iyo baakad tiishiyo ah
- Magaasiinada ama buug (tarooli lagu iibinayo magaasiinada iyo cunto yaryar ayaa ku soo mari doona subax walba)
- Kaarka Medicare-ka
- Pension, Health Benefit ama Pharmaceutical Benefit ama Concession card hadday khusayso
- In kugu filan oo ah daawada aad hadda qaadato
- Macluumaad kasta oo lug ku leh warqadaha xawilida, raajooyin, warbixinada ultra-sound iwm
- Quruush telefoon ama kaarka telefoonka (waxa laga helli karaa tabakaayada)
- Fadlan ha keensan telefishankaaga ama moobayl maadaama kuwani faragelin ku samayn karaan qalabka isbitaalka
- Waxaanu si adag kugula talinaynaa in aadan keensan waxyaalla qiima gal ah sida dahab, kaararka deynta ama lacag aad u badan.

Sida lagu tago Royal Women's Hospital-ka Cusub

Gaadiidka dadweynaha

- Taraamka 19 – wuxuu istaagaa geeska Royal Parade iyo Grattan Street
- Taraamka 55 iyo 59 – wuxuu istaagaa geeska wadada Flemington Rd iyo Grattan St
- Basaska 401 iyo 402 – waxay istaagaan Grattan St dibadiisa ee Royal Melbourne Hospital
- Goob taksiyadu dhigtaan ayaa ku taalla isbitaalka hortiisa wadada Grattan St.

The Royal Women's Hospital waa ka reeban yahay sigaarka.

Gaari dhigashada

Goob gaari dhigasho oo dadweyne ayaa laga helli karaa wadada Flemington Rd iyo goob dhigasho oo loogu talagalay dadweynaha soo booqanaya bukaanka. Boosas tira yar oo muddo gaaban ayaa baabuurta la dhigan karaa si qofka looga qaado ama loo dejiyo wuxuuna ku yaallaa dabaqa hoose oo dhulka ah, wadada Flemington Rd mid ayaa ku yaalla. Wiishashku waxay toos kuu geynayaan miiska soo dhowaynta, adeega bukaan socodka ama qolalka lataliyaha barayfitka ah.

Dadka soo booqanaya

Fadlan iska xadad dadka ku soo booqanaya maadama ay daal kugu abuuri karaan. Waxaa laga yaabaa inay ku caawinto haddii qaraabo ama qof aad kuugu dhowi u soo jeediyo kuwa kale inay soo gaabiyaan booqashadooda ilaa aad ka soo xoogaysato. Taasi waxay kaloo khusaysa telefoonka. Saacadaha booqashadu waa 10.00subaxii ilaa 8.00fiidkii.

Wicida telefoonada

Waxaa sariirtaada dhinaceeda ku yaalla telefoon. Telefoonada waxweydiinta ee la siinayo saaxiibada iyo qaraabada waa 8345 3030. Waxaad u baahan doontaa inaad ka soo gadato kaarka telefoonka tubakaayada dhulka si aad telefoon u dirsato.

Raadiyaha iyo Telefishanka

Dhamaan sariiraha waxaa lagu rakibay telefishan kaas oo la kiraysan karo. Karaaniga qaybta ayaa kuu qaban qaabin doona in laguu daaro haddii aad doonayso inaad isticmaasho telefishanka si aad u daawato janalka filimada. Shaqaalaha telefishanku waxay shaqeeyaan laga bilaabo 2.00duhurkii ilaa 6.00maqribkii.

Joogistaada isbitaalka

Macluumaadka bukaanada qaliinka lagu samaynayo

Intaadan imaan isbitaalka ka feker waxaad u baahan tahay inaad diyaarsato si aad guriga ugu soo noqoto.

Aadida Guriga

Waa muhiim inaad isu diyaariso markaad guriga aadayso ka hor inta aadan isbitaalka imaan. Dhererka waqtiga aad joogi doonto isbitaalka waa lagaala hadli doonaa ka hor intaan lagu jiifin. Bukaanada badanaa waxaa laga saaraa subaxii inta u dhexaysa 9.30subaxii iyo 10.00subaxii. The Royal Women's Hospital wuxuu leeyahay shaqaale la helli karo si lagaala hadlo taageero kasta oo siyaada ah oo laga yaabo inaad u baahan tahay bixitaankaaga, sida caawimo guri. Waxaa lagu talinayaa inuu qof kuu raaco guriga habeenka u horreeyana kula joogo.

Adeegyada Isbitaalka oo laga yaabo inay wax ku anfacaan

Xarunta Macluumaadka ee The Women's Health

Kani waa adeeg la iska yimaado oo ku yaalla dabaqa dhulka ah. Waxaa yaalla buugaag kala duwan, magaasiino, iyo qoraalla ka hadlaya caafimaadka dumarka. Waa lagugu soo dhowaynayaa inaad soo booqato ama la hadasho kalkaalisada caafimaadka wixii ku saabsan arrimaha caafimaadka dumarka.

Adeegyada luqada

The Women's wuxuu ku dhiirigeliyaa in la xaqiijiyo isticmaalida mutarjumiin si loo hubiyo in dadka afkooda kowaad aanu Ingiriis ahayn ay la xiriri karaan dhakhtarka iyo umulisadooda. Mutarjumiinta (oo ay ku jiraan kuwa dadka dhegaha la'a) waxaa la codsan karaa markasta markaad tahay bukaan jiif. Ballamaha waa inaad horay u codsataa. Adeegyada luqadu waxay ka tirsan yihiin Women's Social Support Services waxayna ku yaalliin dabaqa hoose ama waxaad wici kartaa 8345 3054.

Aboriginal Women's Health Business Unit

Adeegaan waxaa helli kara dumarka Aborijiniska iyo Torres Strait Islanders-ka ah. Adeegu wuxuu bixiyaa kaalmo iyo u hadlida dumarka ATSI iyo qoysaskooda. Waxayna ku yaalliin dabaqa ku yaalla dhulka wuxuuna ku ag-yaallaa the Women's Health Information Centre ama waxaad wici kartaa 8345 3047.

U hadlaha macmiilaha (Consumer Advocate)

U hadlaha macmiiluhu wuxuu soo dhowaynayaa waxaad ka oranayso adeega – wax fiican iyo wax xunba – waqtigaad isbitaalka ku jirto. Wax ka dhihidaadu muhiim bay u tahay xagga caawinta wanaajinta adeegayaga iyo dumarka kale iyo qoysaskoodaba.

Wuxuu ku yaalla isbitaalka dabaqiisa kowaad ama waxaad telefoon u diri kartaa 8345 2290 ama 8345 2291.